

Waa Maxay Shuruudaha shaqada ee FoodShare?

Qaar ka mid ah dadka codsada FoodShare waxaa laga yaabaa in shuruudo shaqo lagu xiro, taasoo laga rabo inay ka soo baxaan inta aan loo bilaabain macaashka FoodShare.

- Haddii da'daadau u dhaxayso 16 ilaa 59, waa inaad raacdaa sharciyada asaasiga ah ee shaqada ilaa iyo oo lagu tixgaliyo inaad tahay qof laga dhaafay. Tan sidoo kale waxa loo yaqaanaa diwaangalinta shaqada FoodShare. Markaad buuxiso codsiga FoodShare ama aad cusbooneysiisato, waxa lagaa rabaa in aad raacdo sharciyarka shaqada FoodShare oo waa in aad u diiwaangashan tahay shaqa-helid.
- Haddii aad tahay da'da 18 ilaa 54 oo aanay carruur yar-yar ku noolayn gurigaaga, waxaad kaliya heli kartaa saddex bilood oo wakhti xaddidan ah kaasoo ah kababka FoodShare ee saddex sanno ilaa iyo aad buuxiso shuruudaha dadka waaweyn ee jidha ahaana awooda iyagoon cidna ku tiirsanayn ama loo tixgaliyo ka dhaafis in loo sameeyay.

Hay'adda kula shaqeyneysa ayaa si faahfaahsan kuugu sharxi doonta shuruudaha shaqada marka ay kula kulmaan oo ay ku wareysanayaan.

Waa maxay barnaamijka FoodShare Employment and Training (FSET)?

Barnaamijka FSET waa wax bilaash u ah qofkii raba, barnaamij ah lacag la'aan oo dadka qaata FoodShare ayaa ku baran kara xirfado ay shaqo ku helaan. Haddii aad u baahan tahay caawimo xaga shaqo raadinta ah, waxaad u baahan tahay inaad buuxiso shuruudaha shaqada ee dadka waaweyn da'dooduna u dhaxayso 18 ilaa 54 ee aan carruur kula noolayn gurigooga, ama hadda shaqeyya oo doonaya inay kordhiyaan xirfadahooda, FSET waxa laga yaabaa inay ku caawiso.

Su'aalo?

La xiriiir hay'adda kula shaqeyneyso wixii su'aalo ah ee aad qabtaan. Si aad hesho cinwaanada ama telefoonada hay'adaha, soo booqo dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm ama soo wac Adeegga Xubnaha 1-800-362-3002 (TTY iyo adeegga tarjubaanada ayaa la idiin heli karaa).



Odhaada USDA ee Joojinta Haybsooca

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafo ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) boostada:
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) fakiska:
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) iimaylka:
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.



State of Wisconsin
Department of Health Services
Division of Medicaid Services
P-16063SO (10/2024)



FoodShare



WISCONSIN



Ka Dhig Wisconsin Mid Caafimaadka U Wanaagsan

Waa Maxay FoodShare ee Wisconsin?

FoodShare Wisconsin, oo sidoo kale loo yaqaan SNAP (una taagan Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada (Supplemental Nutrition Assistance Program)), waxaa uu dadka dakhligoodu kooban yahay ka caawiyaa inay iibsadaan cuntada ay u baahan yihiin oo u wanaagsan caafimaadkooda.

Yaa la siiyaa macashka FoodShare?

Dadka soo socda ayaa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan FoodShare:

- Dadka da'da weyn
- Qoysaska
- Dadka soo haajirey oo ka soo baxa shuruudaha
- Qofka kaligiis nool
- Dadka naafada ah

Xitaa haddii aadan xaq u laheyn barnaamijkan dhalashada Mareykanka oo aadan heysan darteed, waxaa laga yaabaa xubnaha qoyska ee ku dhashay Mareykanka in ay xaq u yeeshaan.

Dakhli intee le'eg ayaa la i soo gali kara welina aan xaq u yeelanayaa?

Qoyskaagu wuu codsan karaa FoodShare haddii dakhliga idin soo gala bil kasta uu ka hooseeye kan ku xusan dakhliga. Shuruudaha dakhliga ee iminka dhaqangalka ah, kala soco dhs.wisconsin.gov/foodshare/fpl.htm.

Noocyada dakhliga ee la xisaabay waxaa ka mid ah:

- Mushaharka shaqada.
- macaashka naafada.
- macaashka Dadka soo halgamay.
- macaashka Lambarka Bulshada.
- Dakhliga dadka iskood u shaqeysta.
- Lacagta dadka shaqada ka dhamaato.

Si aad u aragto in aad heli karto manaafacaad, booqo access.wi.gov oo guji ka eego inaad caawimaad heli karto "See if you can get help."

Immisa ayaa la i siinayaa?

Inta la isa siiyo ee FoodShare waxa ay ku xiran tahay dakhliga iyo xajmiga qoyska.

Waa maxay cuntada aan ku iibsano FoodShare?

Waxa aad ku iibsano kartaa cuntada soo socota:

- Rooti iyo siiriyaal.
- Khudaarta iyo miro.
- Oonta xoolaha.
- Hilib, kalluun iyo digaag.
- Dhirta iyo miraha la beerto ee cuntada qoyska laga saaro.

Waxyaabaha **aadan** ku iibsano karin lacagtada cuntada lagu siiyo:

- Waxyaabaha aan raashinka aheyn (cuntada xayawaanka, warqadaha, saabuunta, alaabada guryaha, alaabada timaha, cadayga, waxyaabaha la isku qurxiyo, iwm).
- Khamriga, alkolada, sigaarka ama tubaakada.
- Cuntada diyaarsan ee dukaanka lagu dhex cuno.
- Cuntada kulul (cuntada la kariyey ee dukaanka lagu cuno).
- Daawada iyo fitimiinada.

Sidee ayaan cunto ugu iibsano karaa manaafacaadka la i siiyo?

Lacagta cuntada waxaa lagu shubaa xisaab si elektaroonik ah loogu wareejiyo oo lagu magacaabo nidaamka (EBT, Electronic Benefits Transfer). Waxaa lagu siinayaa kaar aad ku adeegan karto oo lacagta ka bixin karto oo lagu magaabo kaarka Wisconsin QUEST. Kaarka lacagta ku jirta kaliya ayaa ku adeegan kartaa.

Xaggee ayaan u isticmaali karaa kaarka QUEST?

Kaarka QUEST waxa aad u isticmaali kartaa in aad cuntada kaga iibsato dukaamada qaata kaartka EBT.

Weliba manaafacaadka ayaa ku sii isticmaali kartaa:

- Qaar ka mid ah suuqa beeraleyda.
- Goobaha dadka waayeeelka ah cuntada loogu diyaariyo.
- Adeegga cuntada diyaarsan, sida Meals-on-Wheels.
- Dukaamada intarnetka qaarkood. Booqo dhs.wisconsin.gov/ebt.htm si aad u aragto liiska dukaamada intarnetka ee aad wax ka iibsano karto.

Sidee ayaan u codsan karaa FoodShare?

Si aad u codsato FoodShare, waxa aad codsiga ka buuxin kartaa:

- Barta internetka – Soo booqo access.wi.gov.
- Telefoonka ama taga xafiisyada – La xiriir hay'adda degaankaaga.
- Boostada – Soo booqo dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm si aad u hesho codsiga, ama la xiriir hay'adaada.

Si aad hesho cinwaanada ama telefoonada hay'adaha, soo booqo dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency/index.htm ama soo wac telefoonka Adeegga Macaamiisha ee 1 800 362 3002 (TTY iyo adeegga tarjubaanada ayaa la idiin heli karaa).

Marka aad soo gudbiso codsiga, waxaa telefoon ama kulan fool ka fool ah kugu wareysanaya shaqaalaha hay'adda.

Ma la iga doonayaa inaan bixiyo Sagaalka Lambar (Social Security Number)?

Qof kasta oo codsada FoodShare waa inuu leeyahay oo bixiyaa Sagaalka Lambar (Social Security Number). Haddii aadan laheyn Sagaalka Lambar (Social Security Number), waa in aad codsataa si aad u codsato FoodShare.

